# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:18 AM** **HANSARD No.27/04** **Kal-fadhiga 27[aad]**

**Fadhigii 15[aad]** **21/April /*2015***

## Warbixinta

### Doorashooyinka ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo Jawaabaha Su'aalaha Mudanayaashu weydiiyeen Komishank.

**Gudoomiye Md. C/raxman M. Cabdilahi (Cirro):-** Mudanayaal, Maanta Waxaa Fadhiga inoog Marti ah Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxayna Warbixin Golaha ka siinayaan Geedi socodka Doorashooyinka, Halka wax maryaan iyo wixii Komishanka u qabsoomey, sidaa darteed waxaan ku soo dhoweynayaa Gudoomiyaha Komishanka, Mudane ku soo dhowow.

**Eng. C/qaadir Iiman Warsame**
**Gudoomiyaha Komishanka D. Qaranka:-**

ASC, Gudoomiye, Gudoomiye Xigeeno iyo Mudanayaal Komishinkii dooroshooyinka qaranka oo isku dhanbaa idin hor fadhiya waxaanan idiinku nimi warqad aad noo soo qorteen bishu markay ahayd April 4teedii, taasaanu ku nimi inaanu xog waran ka bixino mudadii aanu xilkan haynay iyo wixii noo qabsoomay.

Komishanka Dooroshooyinka Qaranka ahaan anagoo tixraacayna warqadaa aad noo soo dirteen, anagoo garowsan waajibaadka distooriga ah ee ku xusan qodobka 53aad farqadiisa 6aad iyo 7aad ee dastuurak JSL, isla markaana ka jawaabayna dalabka nooga yimid xagiina, waxaa sharaf noo ah in aanu Golaha Wakiilada JSL idinku soo booqano oo aanu goleweynaha hortiisa idiinka warbixino xogaha iyo shaqooyinkii qaranku noo igmaday aanu idiinku soo gudbino.

Hadaan waxqabadka komishanka dooroshooyinka ka waramo intii aanu qabanay xilkan, mudanayaal iyo marwo waxaa xubnaha komishanka qaranka la ansixiyey 29 November 2014, idinkoo gudanaya waajibaadkiina sharci ee aad masuulka uga tihiin qarankan ee idin saaran, waxaan xilka la wareegnay xilkan qaran December horaanteedii 2014.

Bishii January 15 2015 waxay komishanka dooroshooyinku qaranku dhamaystireen bixinta qandaraasyadii qalabka ee loo isticmaalayay diwaan

galinta JSL kaas oo ay ku guulaysteen shirkad laga leeyahay dalka Denmark oo magaceda la idhaa **Eetiya** nagala shaqayn doontana keenista qalabka loo isticmaali doono, waxaa komishanku dooroshooyinka qaranku ay safaro ugu baxeen dalka Kenya, si ay qaadhaan bixiyaasha ugala soo hadlaan ama qolooyinka daneeya doorashada iyo diwaan galinta Somaliland ugala soo hadleeen hawlaha maaliyadeed ee ku aadan diwaan galinta codbixiyaasha, waxaan oo qabsoomay in aanu helno kharashkii ku bixi lahaa diwaan galinta soo socota ee JSL oo %75 ay bixinayaan qaadhaan bixiyaasha inaga caawiya dimquraadiyada, %25 ay bixinayso xukuumada JSL.

Waxaa xubnaha komishanka iyo shaqaalohoodu oo ay weheliyaan guddida farsamo ee saddexda xisbi qaran safaro shaqo ugu baxeen dhamaan gobolada iyo degmooyinka, anagoo soo qoraynay shaqaalihii ka hawl gali lahaa gobolada iyo degmooyinka xaga komishanka dooroshooyinka qaranka isla markaana qiimeyn aanu kusoo samaynay.

Waxaa kale oo aanu iyadana qornay shaqaalihii muhiimka u ahaa hawshan aynu gali doono ee culus ee xarunta gudeheeda, waxaanu si joogto ah warbixin u kala qaadana hogaanka sare ee xisbiyada qaranka guddida farsamada ee saddexda xisbi qaran, madaxweynaha iyo beesha caalamka ee daneeya hawlaha dooroshoyinka dalka JSL, inagana caawiya inta badana inagu soo booqda caasimada dalka ee Hargeisa, gorfayn iyo wada tashi la yeelanay guddida farsamo ee saddexda xisbi qaran mudana soo socotay, waxaanu soo saarnay jadwalkii diwaan galinta codbixiyaasha, waxaanu soo saarnay wakhtiga la bilaabayo diwaan galinta codbixiyayaasha inagu soo fooda leh ee qofka ugu horeeya is diwaan galin doono wakhtigay ku beegan tahay oo ah 21 July 2015 inshalah iyadoo aanu madaxweynahana u qornay warqadii aanu kaga codsanayay inuu ku dhawaaqo sida qaanuunku qorayo isla markiina madaxweynuhu wuu ku dhawaaqay oo wuu ka jawaabay.

Waxaanu wada tashi kala yeelanay hogaanka sare ee xisbiyada qaranka aasaaska laga duulayo go'aaminta maalinta doorashada, madaxtooyada iyo golaha wakiilada ee soo socota oo ah in la raaco xeerarka dalka u yaala, waxaanu xalay u gudbinay madaxweyhana JSL cayimaadii maalinta ay qabsoomayso doorashada madaxtooyada iyo golaha wakiilada oo ku beegmaysa maalinta ay bisha June tahay 1 2016.

Hadaba hawlahaa aanu soo qabanay kolay waxaa naga hor imanaya ama na hortaagan ama aanu soo dhaafnayba caqabado, hawlaha qabyada ah ee ku xidhan golaha wakiilada iyo xukuumadaba waxaa aynu wada ogsoonahay in xeeerkii doorashada ee golaha wakiiladu aanu diyaar ahayn oo uu u baahan yahay qabyo tir, sidaa daraadeed waxaanu idinka codsanaynaa anigoo ka wakiila komishanka dooroshooyinka qaranka oo hortiina fadhiya in la dhamaystiro xeerka doorashada golaha wakiilada JSL in waxka badal iyo kaabis lagu sameeyo xeerka diwaan galinta codbixiyayaasha taaso aanu diyaarinay meelo iyo qodobo u baahan in dib loogu noqdo wabilaahi tawfiiq.

## Su'aalaha Mudanayaashu weydiiyeen Xubnaha KDQ:-

1. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-**

   **Su'aal:-** Term kasta oo wax la doorto muda xilleed 5 sanno ah bay leedahey, mudaadaas ayayna tahey in doorashada lagu qabto, hadii mudada ay ku dhici weydo waxay u baahan tahey sharciyad, sharciyana marka doorashadu wakhtigeeda ku qabsoomi weydo guurtida la wareegta oo wakhtiga kordhisa markey xaalada qiimeyso, idinkuna waxaad halkan ka sheegteen oo tidhaahdeen sanad baanu hawshaa ku dhameynaynaa, hadey guurtidu kordhiso 9 bilood ama sanad iyo badh oo wakhtigey doonto kordhiso, qorshihiina doorashada ee aad hada noo sheegteen xaguu qabanayaa?

   **C/fatax Xubin Komishanka Doorashada ah:- Jawaab:-** Hadaan ka jawaabo su'aasha Mudanaha, waa laba arrimood oo is barkan, mid waxay ku saabsan tahey Mudda komishanku ku dhawaaqey iyo xiliga ay ku began tahey, taasi waxay ka dhalatey oo lagu saleeyay mudada ay tahey inay ku dhamaato diiwaangalinta Codbixiyayaasha, arrintaasina waxay aheyd arrin ay isla qaateen saddexda xisbi qaran iyo komishanka doorashooyinku isla markaana loo gudbiyay Madaxweynaha oo degreeto Madaxweyne ku soo baxday, tan kalena waa tan sharciga aad ansixiseen ku xusan oo ah in marka diiwaangalintu dhamaato 6 ka dib doorashadu dhacdo, oo xeerku dhigayo in doorashada la qaban karo lix bilood ka dib maalinta la shaaciyo Liisaska Diiwaangalinta codbixiyayaasha, Markaa iyadoo la qadarinayo labadaa arrimood ee mudada diiwaangalinta codbixiyayaasha iyo Mudada Sharciga ah ee Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaashu dhigayo oo ah sharciga aad soo saarteen oo ay kaabeyso mudadaa diiwaangalinta la dhameynayo ee Madaxweynuhu degreetada ku soo saaraey.

   Arrinta guurtida anagu Xeerka ama sharciga kumaanu arag meel ay kaga taalo inaanu la tashano ama aan sugno ee waxay aheyd arrin farsamo oo aan ku sargoyney Xeerka aad ansixiseen iyo mudada Madaxweynuhu degretada ku soo saarey.

2. **Md. Cali Maxamed Aadan (Cali Barre):-**

   **Su'aal:-** Komishanka Doorashooyinku waa komishankeenii oo aad iyo aad bay horta ixtiraam inooga mudan yihiin, laakiin arrinta aynu ka hadleyno ee aynu isweydiinayno waxay tahey waa sharciyada dalka oo ana halkan aanu ku fadhino, komishankuna ku fadhiyo, Madaxweynuhu ku fadhiyo, Qarankuna ku fadhiyo oo uu qaran ku yahay waana Dastuurka iyo Sharciyada ka

dheegma, su'aasheydu waxay tahey Dastuurka Qodobka 42aad Faqradiisa 3aad iyo Qodobka 83aad Faqradiisa 5aad waxay cadeynayaan marka doorasho wakhtigii loogu talo-galey dhiciweydo oo tan Madaxweynaha iyo tan Golaha Wakiilada ah ay dhiciweydo waxaa wakhtiga qiimeynaya duruufaha laga bixi karo xiliga doorashadu qabsoomeyso oo cayimaya Golaha Guurtida, komishanka iyo cid kaleba xaq uma laha, hadey doorasho wakhtigii shanta sano markey dhamaato dhici weydo, aad horena u cadeyseen in aaney doorasho dhaceyn 26ka june, marka waxaad u baahan tihiin inaad wakhti sharciya haysataan, wakhtigaa sharciga ahina guurtida ayuu ku xidhan yahay, marka idinku 1 june 2016 sharcigee u cuskateen, Sharcigii doorashada kuma yaal, dastuurkana kuma yaal, xagee ka keenteen, waayo waajibkiinu wuxuu ahaa inaad madaxweynaha u gudbisaan oo tidhaahdaan doorashadii wakhtigeedii kuma qaban karno, madaxweynuhuna Guurtida u gudbiyo, guurtiduna wakhti sharciyeyso, marka maad la sugtaan inta wakhti la idiin sharciyaynayo? Xageena u cuskateen wakhtiga aad qabsateen ee 1 june 2016ka?

**<u>Gudoomiyaha Komishanka:- </u>Jawaab:-** su'aashaa Jawaabteeda hore ayaan uga jawaabney oo Cabdifatax xubin komishanka ah baa ka jawaabey, anagu Sharcigii aad soo saarteen iyo farsamadayadii baan is barkiney anagu.

3. **Md. Naasir X. Cali Shire:-**

**Su'aal:-** waxaad cayinteen markaad eegteen oo daraasaad ku sameyseen hawlaha idin horyaala in doorashadu dhici doonto 1 june 2016ka, hadaba si cadaalad ay u noqoto oo dadka codbixiyayaashu u wada coddeeyaan waxaa wakhtigaa aad cayinteen in Gobolada dalka qaar ka mid ah ku jiraan duruufo oo gobolada qaar laga xagaa baxo oo aan goobaha la jooginba, markaa maaney cadaalad daro aheyn in goobihii qaar laga codeeyo qaarna aan laga codeyn, Markaa sidee u cuskateen oo ugu xaqsoorteen dadka Codbixiyayaasha ah ee reer Somaliland?

**<u>Gudoomiyaha Komishanka:- </u>Jawaab:-** xildhibaanku wuu mahadsan yahey waana uga jawaabeynaa su'aasha, waanu qiimeynay waxaanuna eegney sharciyada ka soo baxdey Golaha Sharafta leh ee aanu hor fadhino, horena way dhacdey oo doorashii hore ee Madaxweynuhu waxay dhacdey 26kii june oo aheyd horaantii xagaaga markaa waxaan filayaa tii kama duwana oo wayba ka soo horeysaa.

4. **Md. C/qaadir X. Ismaciil Jirde:-**

Aniga mid waa su'aal aan weydiinayo, midna waa xoogaa iftiimin ah, Komishanka Doorashooyinku wuxuu xaq inuu Jidwal sameeyo ilaa maalinta la doorto ee la dhaariyo ilaa dhamaadkiisa inuu sameeyo timeline, timelinekaasi wuxuu leeyahay wakhtiyo uu leeyahay maalintaas ayay hawshu noogu dhamaatey, maaha go'aamin ee wargalin toodu oo waxay wargalineysaa Golayaasha Qaranka, Xukuumada iyo dadweynaha, markaa waxaan jeclaan lahaa timeline-ka inaydaan duuduub ku sheegin, waxaa lagu qanci karaa intaad soo daabacdaan oo qolyaha ay khuseyso iyo Golayaasha noo keentaan isagoo daabacan, marka timeline-ka la eego ma yahey wax macquul ah mise maaha, markaa toodu go'aamin maaha, timeline-kooduna kuma xidhna guurtida iyo Xukuumadana toona oo shaqadoodii.

Tan kale, Wakhtiga iyagu way sheegtay Guurtidana iska leh, waxa laga cararayaa waxa weeye markey iyagu timeline-ka keenaan in fadwo siyaasadeysan guurtidu soo saarto, Guurtidu waa inay ka duushaa ileyn nimanka doorasha hagaya waa komishanka doorashooyinkee waa inay timeline-kooda ka duushaa oo aaney arrin fadwo siyaasi ah oo iyadu la timaado ayna galin, xaqna waxay leeyihiin in stakeholderska oo dhan wax laga weydiiyaa timeline-ka oo xisbiyada siyaasiga ah wax laga weydiiyaa, waa in cid kasta wax laga weydiiyaa oo ilaa dadweynuhu ku yeeshaan contribution, maaha in guurtida la yidhaahdo wax iska soo tuura laba sanadood, saddex sanadood ama sanad maaha,

**Su'aal:-** Diiwaangalinta Codbixiyayaasha wixii inaga dhacey tii hore weynu ogeyn, $10 milya dollar in ka badan baa inaga baxay oo inaga khasaarey oo cid waliba waxbay ku laheyd khaladkeeda hadey tahey Golayaal, komishan, xukuumada iyo dadweyneba, markii la bilaabey waxaad moodeysay in dadku so il-baxayay oo waxaa laga bilaabey Gobolka Saaxil, saaxil khaladaadku wuu ku yaraa iyo duplicate-ku, wixii ka dambeeyay dadku wuu sii ilbaxay oo waxbaa laga baranayay Gobolba gobolka ka dambeysa oo inaanu hawshani soconeyn baa la sii fahmayay, markaa waxaa maanta u baahanahey inay komishanku halkan ka cadeeyaan inaan compromise laga galeyn inay codeeyaan dadka kuwa diida inay farta saaraan oo farta laga qaado, oo hadhow aan laga tabo-tagin oo axsaabta iyo qaabiiladu aaney ka dabo-tagin, markaa taa maanta dadka iyo umadaba inaad u sheegtaan maanta ayaan dooneynaa in qofka farta diida ama isha diida aaney codeyn xaq u laheyn oo aaney codeyn doonin oo halkaa ka cadeysaan?

**<u>C/fatax Xubin Komishanka Doorashada ah:-</u> Jawaab:-** waxaan filayaa in su'aasha xildhibaanka ay tahey far kuwada godan Somaliland, wixii inaga dhacey diiwaangalintii hore, hadaba si aanu taas u damaanad qaadno waxaanu xildhibaanada hortooda ka cadeynaynaa in aaney dhici doonin in Card ama Warqad ay daabacanto ilaa qofka isha laga qaado mooyaane, waxaanu haysanaa oo kaliya hadii uu yimaado qof indhoole oo indhuhu damyihiin waxa laga yeeli karo, taasna waxaanu sameynaynaa in xarunta dhexe laga ogolaado si marka la cadeeyo inuu indhoole yahey oo laba indhoodba ay maqan yihiin in arrintaa xarunta dhexe laga ogolaado.

Markaa qalabka iyo qaabka aanu arrintaa ugu talo-galney maaha mid qaadaneysa sidii barigii hore in qofku biometry-ga qofku ka tago oo indhaha ah, cardna ku soo bixi maayo, warqadna ku soo biximeyso marka laga tago qofka indhoolaha ah oo iyagu sidaanu fileyno ah tiro aad u yar, marki hore diiwaangalintii waa inagii eegnay qalabku sida uu shaqeynayo, hadana kuma qanacsanin oo iminka waxay noqneysaa in iyadoo xildhibaanada qaar ka joogaan axsaabta qarankana ay gudidda farsamo ka joogto inaynu qalabka iska tijaabino inteynaan umada u dirin, dabadeedna halkaa inooga soo baxdo hadii ay jirto meel gaabis kaga jiro, markaa bilaabi meyno ilaa wuxuba sax inoo noqdaan.

**Diiwaangalintu inoo wanaagsanaato:-** war iminkaba komishan kaliya laguma ogee dadkoo dhan baa lagu ogyahay hadaan bahashaa laga wada shaqeyn way xumaaneysaa oo 7 xubnood oo komishan waxba ma hagaajiyaan, iyagu xaruntaas ayay fadhiyaan cida gacanta ka qaadaneysaa waa Gobolada iyo degmooyinka, shaqaalahana gobolada iyo degmoyinka laga qaadanayaa, dee waa dhankey ka baxdaaba waa bakeyla qaleen, waxaanu ka rajeynaynaa guurtida iyo wakiilada iyo cid walba inay ka halwgasho sidii diiwaangalintu inoogu hagaagi laheyd.

**Tan timeline-ka**:- hore waanu u qaybiney oo ah inta diiwaangalintu nagu qaadaneyso waanuna siiney axsaabta qaranka, madaxweynuhuna waa kii ku soo saarey degreetada, arrinta labaad waxa keenay qadiyadii Xeerka ee lixda bilooda aheyd, markaa qadiyada timeline-ku waa tii hore oo lagu darey qadiyada sharciga ee lixda bilood.

5. **C/qaadir Jaamac Xaamud:-**

**Su'aal:-** Waxa jira Gobolada Bariga inaan doorashadu si fiican uga qabsoomi jirin maamulkuna aanu meelaha qaar gaadhin, wakhti (timeline) waad sameysateene ma ku darsateen timeline-kaas in doorashada la gaadhsiiyo oo doorashadu mar dalka kawada dhacdo, hadaney ka dhicin waxyaabo kale ayaa

meesha soo galaya, markaa in diiwaangalinta iyo wacyigalin la gaadhsiiyo ma idiinku jirta qorshaha?

**Siciid Cali Muuse Xubin Komishanka Doorashooyinka ah:- Jawaab:-** waa arrin jirta arrinta uu soo qaadey xildhibaanku, waliba waxaa intaa sii dheer inay jiraan degmooyin cusub oo aaney hore uga dhici jirin doorashooyinku sida laasqorey oo kale, waxyaabaha aanu sameynay waxaa weeye inaanu isugu yeedhney gudi heer qaran ah oo ka mid yihiin Wasiirada Gaashaandhiga, Wasiirka Arrimaha, taliyayaasha ciidama Militeryga iyo Booliiskaba iyo Komishanka Doorashooyinka, waxaanu ugu yeedhney oo aanu isla soo qaadney sidii aanu u sameyn laheyn ama loo ogaan lahaa xaalada amaan ee Gobolada ama Degmoyinkaasi, waxaanu ku talo-jirnaa inay hawshaasi noqoto mid heer qaran ee aaney aheyn mid heer Gobol ama degmo, Gudiddaasi way nala qaateen hawshaas oo waanu bilaabeynaa, waxaa ka mid ah Taleex oo maaha laasqorey oo kaliya, markaa hawshaasi sidaas ayay ku bilaabmeysa oo ku soconeysaa.

Waxaanu dooneynaa in Gobolada ama Degmooyinkaasi inaanu Wacyigalin ka xoog badan tan Gobolada iyo Degmoyinka kale ka qabano, waxaanu qaadney talaabooyin aanu kula xidhiidheyn deeganadaasi sidii ay u suurta-gali laheyd in dhulkaas laga wada qabto doorashadu oo uga dhacdo sida degaamada kale, waxaanu la xidhiidhney Salaadiinta iyo dadka kale ee magaca leh ee degaankaas jooga, waxaanu la xidhiidhney taliyayaasha ciidamada ee mandaqadaas, waxaanu soo dhameystirney iyana shaqaalihii Komishanka ee Heer Degmo oo dhulkaas ka shaqeynaya oo aanu hawl-galiney, waxaanu dooneynaa markaa talaabadaas heerka qaran inay noqoto muhiimada ugu weyn ee Wacyigalinta.

Wacyigalintu maaha mid komishanka oo kaliya ay wax ka qaban karaan, xildhibaanka su’aasha iweydiiyay ayaa looga baahan yahay inay noqoto mid heer qaran ah oo arrintaas xildhibaanadu uga qeyb-galaan, waayo waa halki xildhibaanada laga soo doornayay, sidaa darteed waxaanu idinka dooneynaa inaad gacan nagu siisaan gaar ahaan xildhibaanada deegaankaasi sidii ay u suurtagalilheyd in dhulkaa diiwaangalin iyo doorasho ka dhacdo, waliba waxaa muhiima marka hore diiwaangalinta, waayo hadaan marka hore la is-diiwaangalin halkaa doorasho kama dhaceyso.

**Gudoomiyaha Komishanka:-** waxaan ku dari lahaa intaa Siciid, Degmada Laasqorey iyo Degmada Taleex way nagu soo siyaadeen oo waanu u bixi doonaa, gudidda heer qaran waxaa ka mid ah xisbiyada qaranka oo dhowaana na raaci-doona, assessment wanaagsana waanu ka soo sameyn doonaa.

6. **Md. Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan):-**

Sharciyada iyo hadii mudadii ay aheyd in doorasho la qabto lagu qaban waayo wixii la yeelayo waxaa cadeeyay Dastuurka Qodobka 42aad faqrada 3aad iyo Qodobka 83aad faqrada 5aad oo sheegaya in hadey dhacdo qiimeyn la sameeyo wakhtiga laga bixi karo arrintaas, tan aad soo jeediseen waa soo jeedin ee maaha valid intaa iyada waynu isla fahamsanahey, waxa u baahan in la iswaafajiyo laba arrimodo sida C/qadir jirde sheegayay labadaas arrimood oo parallel ah, mid waxa weeye waa inaanay dhicin kordhin siyaasadesan, isla markaana ayna dhicin culeys komishanka iyo Qarankaba fuula oo waxaan suurtagal aheyn qaranka lagu dirqiyo taas oo aan inagu soo noqon doonta, dastuurkuna wuxuu siiyay guurtida idinkuna waxaad sugi doontaan marka xeyndaabka sharciga la idiinku ansixiyo, waana arrin qaranka oo dhan wada ogyahey.

**Su'aal 1:-** waxay tahey, laba doorasho ayaa isasaaran, 7 xubnood ee komishankuna mid ka mida oo laba doorasho soo taagnaa inaanu jirin, qaranka oo dhana hore ugama dhicin, markaa waxaan filayaa in culeys kii hore ka badan inagu soo kordhey, inaynu kawada shaqeyno waa loo baahan yahay oo ka wada diyaar garawno, labadaa doorasho waxaa ku jirayaa wax ka duwan qorshayaashii hore ee la sameyn jirey, marka laga yimaado xildhibaaanadayadan Xeerka doorashada golaha wakiilada waxaa la ansixiyay 2005tii bishii labaad, anagana waxaa nala soo doortey 5/9/2005kii, 10kii sano wax yar baa nooga hadhsan, 10kaa sano markii ugu horeysay ayuu ajendaha soo galey, markaa masuuliyadaha dee waadgaraneysaan inaanu qaar badan ku leenahey, markaa idinku qorshaha aad soo dhigteen ee sharciyadeeda qiimeynta guurtidu leedahay ma qorshe qiyaas ah baa mise waa qorshe aad isleedihiin sidaasey ku dhaceysaa ileyn wixiina waa mustaqbale?

**Su'aal 2:-** sida uu leeyahay Xeerka diiwaangalintu idinkuna aad sheegteen lix bilood ka hor waa in diiwaangalintu dhamaataa, markaa dhamaadka diiwaangalintu waa goorma, waynuna soo marney diiwaangalinta oo mar dadkaa is-diiwaangaliya, marna data-dii baa gobolka taal oo sanduuq lagu guraa, marna server-kii xarunta lagu soo ururiyaa, mar isagaa kala hufa, mar liis baa la soo saara, mar software baa la hayaa, marna dadkii baa cardkii loo geeyaa oo qof walba ogaado meeshu ku qornaa, wixii khaldamey baa la saxaa, shaqadaas oo dhan waxaa loo yaqaan diiwaangalin, qofku markuu cardkii heysto meeshiina ogyahey ayaa la diiwaangaliyay, goorma u aqoonsateen

maalinta Diiwaangalintu dhamaato ee sharcigu dhigayo ee lix bilood ka dib doorasho la qabanayo?

**C/raxman Xubin Komishanka doorashooyinka ah:- Jawaab 1:-** runtii su'aalo aad u mihiima ayuu xildhibaan Cali na weydiiyay, tan hore ee aheyd ma tentative timeline baad soo saarteen, culeyse ma idinku noqoneysaa, calculations baanu mudo aad u faro-badan u fadhiney intii aanu soo saarney tii hore diiwaangalinta wixii ka dambeeyay, meel walba waanu ka eegney si faah-faahsana waxaanu ugu fadhiisiney Xeerkii Baarlamaanka ka soo baxay, waxay faa'iido ka tahey, kow inuu cadaado wakhti aanu is leenahey waa lagu qaban doonaa doorasho, guideline bayna u noqoneysaa guurtida lafteeda oo si aaney isu odhan tolow komishanka ma waxbay ku noqoneysaa mise kuma noqon karto wakhti aaney markaa hubin haduu hor yimaado, laakiin iminka wax badan baad moodaa inay taasi kala cadeyneyso, sababtuna waa timeline-ka waxaanu ku soo saarney xisaabaad (calculations) mana noqon doonto wax culeys nagu noqda wada qabashada labada doorasho hadii ilaahey yidhaahdo.

**Jawaab 2:-** Diiwaangalintu xiliga ay dhamaaneyso waxay ku taalaa timeline-ka aanu soo saarney si cad bayna ugu qeexan tahey waana 30 November 2015kan lagu jiro ayaa ku eeg dhamaanshaha Diiwaangalinta Codbixiyayaasha hadii ilaahey yidhaahdo.

7. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-**

**Su'aal 1:-** Gobolada ayaad mudo soo wareegteen, imtixaano ayaad ka soo qaadey xubnihii komishanka ee Goblada iyo degmooyinka, halkii kumeydaan magacaabine halkan ayaad kula soo noqoteen, mudo ayaad haysateen, maxaad intaa u haysateen ma cid baad kala tashaneyseen, su'aasheydu waa goorma ayaad soo saareysaan Komishankii Gobolada iyo Degmooyinka>

**Su'aal 2:-** su'aashan Gudoomiyaha Komishanka ayaan weydiinayaa, Gudoomiye maalin aad xaflad ka hadleysay waxaad dadka ugu bushaareysay inay dadku ka codeyn doonaan ama ka codey karaan goob aan goobtii ay iska diiwaangaliyeen aheyn taas oo xeerarka Diiwaangalinta iyo Doorashooyinka khilaafsan, taana waxaan jecelahey gudoomiyaha toos u weydiinayaaye halkee ku yaalaa arrinka qodobka qaanuunka ah jabiyay?

**Su'aal 3:-** Waxaa jira Gobolada Bariga Sanaag barri, Sool iyo Buuhoodle intaba tuulo kasta ciidan baa jooga qaran, goobaha qaar waliba madaxweynaha marey kuwa kale dhamaantood waxaa marey Wasiirada hadey taleex tahey, hadey

xudun tahey iyo boocame taheyba, is xambaarkuna wuxuu adhaxda ka jabiyaa xuquuqda deeganadaasna shacbiga goboladaa degan, maanta doorashadii ayaa meesha ku jirta oo xaqii gaarka ahaa ee Goboladaasi lahaayeen ah, waagii dhoweyd ee Diiwaangalinta Goobaha Sanaag Barri iyadoo loo diyaar garoobey oo xafiiskii furmey oo shaqaalihii la qorey oo wax walba diyaar yihiin ayaa xukuumadu amar ku bixisey inaan goobahaa la iska diiwaangalin oo nabadgalyadooda qaadeyn, amarkaasina mise siyaasi ah buu ahaa, Markaa Maxaa Damaanad u ah oo aad u heysaan umada halkaa degan ee 25ka sano xuquuqdoodii ka maqneyd?

**Su'al 4:-** Waxaa jira Goobo Waqooyiga Hargeysa ah oo 7 sanduuq ah oo aan nabadgalya daro ka jirin oo aan colaad jirin oo umad degan ah sala calee oo sanadkasta xuquuqdooda doorasho waaya oo aan Xeerkana laga saarin, waayo idinka waajibkiinu waxa weeye inaad ku shaqeysaan Xeerarka Diiwaangalinta iyo Doorashooyinka, ma idiin qoran yihiin?

**<u>Kaltuun Sh. Xasan Xubin Komishanka ah:-</u>**

**Jawaab 1:-** wuu mahadsan yahay Xildhibaanku, su'aasha shaqaalaha, Shaqaalaha sida aad sheegtey waa run oo waanu soo qaadaney Shaqaalihii Gobolada ka shaqeyn lahaa, waana noo dhameystiran yihiin, waxaa kaliya oo noo dhiman heshiisyadii (Contracts) aanu la gali laheyn, waxaa jiraya waxyaabo caqabado noqon karaya kuwaas oo ah ineynu marwalba dad la shaqeyneyno oo budget-ka lagu shaqeynayaa uu xadiddan yahey, markaa waxaa isku sar go'an budget-ka aanu u heyno iyo shaqada ay noo qabanayaan shaqaalaha komishanka ee Gobolada iyo Degmooyinku, dhowaana waanu u gudbin doonaa insha'alah, waana heynaa liiskoodii oo dhameystiran.

**Jawaab 3:-** Dhinaca Barri iyo dadka ay xuquuquhu ka maqan yihiin, dee sida aad sheegtey dhowr iyo labaatan sano ayay ka maqan yihiin, waxa la yaabaa inaanan anagu laba maalmood xuquuqdoodii ku keeni Karin, waxaanu u baahanahey inaanu soo eegno meelaha ay wax ka jiraan (assessment), waxaana noo qorsheysan sida ay hore u sheegeen xubnaha komishanku inaanu u baxno Gobolada Barri iyo meelaha kale ee cabashooyinku ka jiraan, dabadeedna aanu qiimeyno maxaa ka jira, maxaa loo bahan yahay in la kodhiyo, intaa ka bacdi ayaa la sugi doonaa wixii xuquuq ah ee ka maqan.

**Gudoomiyaha Komishanka:-** Xildhibaan aad u mahadsan tahey, 7 sanduuq ee Waqooyiga Hargeysa waxay ka mid yihiin meelaha aanu qiimeyn doono, assessment baanu ku sameyn doonaa insha'alah.

**Jawaab 3:-** su'aasha aad aniga toos ii weydiisay, sharciga na hogaaminaya oo xayndaabka sharciga ma dhaafeyno sida aanu iminka ugu sar-goyney shaqadayadii cusleyd ee aanu soo qabaney sharciga, waxaana aheyd arrin khalad u baxdey, anagana waxaa markasta na xakameynaya Sharciga oo sida sharcigu sheegayo ma dhaafeyno.

8. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-**

**Su'aal 1:-** hore waxaa u dhacdey oo aynu khibrad u leenahey in diiwaangalinta codbixiyayaasha ee ina soo martey in ay aheyd mid faashil ah oo uu sababayay qalabkii la keenay oo tayadiisu aad u liidatey, waxaad sameyseen timeline, qalabkiina wali ma iman meydina tijaabin inuu sidii kii hore tayadiisu liidato iyo inuu yahey mid wanaagsan oo timeline-kiina waafaqaya, markaa hadii uu tijaabada ka bixi waayo, qorshana aydaan ku darsan wakhti aad dib ugu doonataan qalab u qalma oo tayo leh oo inaga saara dhaawicii diiwaangalintii hore ee ina dhibaateysay, miyaaney taasi muujineyn in timelinekiinu qabyo yahey inu baahan yahey qiimeyn dhab ah oo ay ku sameeyaan cid u leh khibrad aad uga badan mudo badana soo arkayay sida golahan guurtida?

**Su'aal 2:=** Timeline-ka aad soo sameyseen kuma cada wakhti la qeybiyo (distribute) kaadhadhka, sida ku cadna waa laba bilood wakhtiga diiwaangalintu dhaceysaa oo midi waa guur-guur oo goboladey ka dhaceysa bilna waxaad tidhi waa la shaandheynayaa, sideynu soo aragneyna waxaas oo dhan waxaa hawl ka badan aheyd wakhtiga la qeybinayo kaadhadhka ee lagu celinayo goobihii dadkii la soo diiwaangaliyay oo la hubinayo qofkasta oo muwaadin ah oo xaq u leh inuu codeeyo inuu helo kaadhkiisii, wakhtiga kumeydaan darsan timeline-kiinan, markaa taas laftigeedu maaney aheyn qabyo muujineysa timeline-kiina?

**Su'aal 3:-** waxaad sheegteen Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiiladu inuu qabyo yahey lagana doonayo in la dhameystiro, xeerkii hore mid ku kooban doorasho kaliya, waxaa lawada ogyahey sababaha xeerka qabyada ka dhigey waxaa ka mid ahaa in la helo cod-bixiyaasha wadanka codka ka dhiibanaya tiradooda si loogu base-gareeyo Xeerka, marka la dhameeyo diiwaangalinta ee la soo saaro codbixiyaasha si Gobolada loogu qeybiyo si xaq iyo cadaalad ah, xiligaas ayaad moodaa in Xeerku sugayo, go'aana lagama gaadhin in kii hore lagu dhaqmo ama la jiifiyaana banaan laga dhigo, timeline-kiina kuma cada wakhti markaad diiwaangalinta dhameysaan Xeerkaa lagu dhameystiro oo inta Golaha loo soo gudbiyo Codbixiyayaasha dhabta ah waa intaa, dabadeedna Goluhu ku saleeyo Xeerkii asalka ahaa, timeline-kiina way ka maqan tahaye, maaney muujineyn inay qabyo badani ku jirto?

**Su'aal 4:-** sida Xildhibaanadii iga horeeyay ee C/qadir jirde iyo Cali-mareexaan sheegeen wakhtiga aad timeline-ka ku sameyseen horta wakhti sharciya maaha, laakiin wakhti soo jeedin ah waad sameyn kartaan waase male awaal, qiimeynta dhabta ahna waxaa iska leh institution-ka Dastuurku siiyay, timeline-kiinu kuma filna oo kaliya inaad tidhaahdaan lix bilood ka hor xeerkiinii banu qaadney, xeerkayagu waa wax jira, laakiin wuxuu ku dhex shaqeynayaa mudo sharciya oo isagu cadeeyay, mudadaasina ma jirto, tusaale 26ka june mudo jirta bay aheyd oo lagu dhex sameyn karo oo lix bilood ka hor la cadeynayay iney caynkaa tahey, su'aasheydu waxay tahey qodobka in qiimeynta dhabta ah ay leedahey Guurtidu iyo kordhinta dhabta ah miyaydaan Komishan ahaan garowsaneyn oo ku dhawaaqi kareyn?

**<u>Gudoomiyaha Komishanka Doorashooyinka:-</u>**

**Jawaab 1:-** anagu Komishan ahaan waxaanu qabnaa inaaney qalabka tayadiisu aaney liidan ee sida loo adeegsado qalabka ay liidato, macnaheeduna aheyd in qofka laga qaado biometre-ga oo qofku farta dhiibto oo fartiiba laga boodey oo aaney jirin in qalabku data la fadhiistey isla markaana qalab xumaadey mey jirin ee waxaa xumaadey qaabka loo adeegsanayo, waana tan aanu iminka ka digtoonaaneyno inay dhacdo.

Tijaabada qalabka, iminka mudo laga joogo 7 bilood ayaanu tijaabadii koowaad sameyney oo sida indhaha loo qaadayo iyo wakhtiga ay qaadaneyso iyo inta qof ee saacadiiba la diiwaangaliyo ayaanu tijaabiney, sidoo kale warbixintayadii ku sheegney in iminka ilaa bil ka hor aanu qalabka laftigiisa mar labaad eegney oo tijaabiney sida uu shaqeynayo, waxaa kale oo jirey in asxaabta qaranka guddidooda farsamo aanu xafiiska ku tusney sida uu u shaqeynayo qalabku, intaas oo tijaabo oo dhacdey wali kamaanu quusan ee tijaabada waanu sii wadeynaa si aynu isu waafajino ineynu helno qalab habka aynu rabno loo adeegsado, markaa hadey inagu ka digtoonaano inaanu qalabku xumaan qalabku xumaan soo saari maayo, weelna wixii lagu shubaa la helaa.

**Jawaab 2:-** wakhtiga qeybinta kaadhadhka, waxaan filayaa sidaad sharciga ku darteen iney aheyd inuu soo baxo liiska kama dambeysta ah, marka tan aad nagula xisaabtameysaan waa inuu mudadii timeline-ka ee inuu liisku soo baxo mudadii kama dambeysta aheyd ee 30 November 2015, kaadhka qeybintiisuna waa hawl komishanka u taala mudadiisa kale ayuuna dhexgashanayaa.

**Jawaab 3:-** Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada JSL, hadii aad sidaa u dhigtaan xeerka iminka sameeya waxaa nagu filan oo kaliya inaad xeerka ku

qortaan erey odhanaya marka ay diiwaangalinta tirada ka soo baxda ayaa kuraasta lagu sargoynayaa.

**Jawaab 4:-** tan sharciga iyada horaan uga hadalney, tan guurtida iyadaa iska leh oo anagu kuma faro-galineyno wixii ay leeyihiin guurtidu iyagaa leh, wixii komishanku leeyaheyna isagaa leh, xeerka aanu ku shaqeynayna wuxuu intii aanu islaheyn xaq baad u leedihiin.

**Md. C/qadir Jirde, Point of correction:-** kuraasta Gobolada ha lagu saleeyo Diiwaangalintu ma jirto waxaa la isticmaalahaa hadii kuraas la qeybinayo tira koobka dalka oo dhan ee diiwaangalinta codbixiyayaashu shuqul kuma laha Diiwaangalinta.

***Gudoomiyaha:-*** Komishanka Doorashooyinku way mahadsan yihiin, Mudanayaal Madaxweynuhu wuxuu inoo soo qorey Warqad uu ku dalbanayo Fadhi wada jir ah oo labada Gole (Guuritda iyo Wakiilada) yeeshaan kaas oo loogu codeyn doono xil ka qaadista Gudoomiyaha Maxkamada Sare, Fadhigaas wada jirka ah wuxu qabsoomayaa maalita Sabtida ee taariikhdu tahey 25 April 2015 wuxuuna fadhigu noqonayaa aqalkan Wakiilada, sidaa darteed waxaa la idinku adkeynayaa inaad ka soo qeyb-gashaan fadhigaa, Fadhigu wuu inoo xidhan yahay.

Waxaa Golaha Warqada Madaxweynaha u akhriyay Xoghaye ku-xigeenka Golaha Wakiilada Mr. Jamaal Jaamac Jiir.

***Speaker:-*** *(The House rose at 11.38 AM and adjourned until Saturday 25 April 2015 at 9.00 AM.)*

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
-----------------------------------------